# Qaadashada lacag SSI oo dheeraad ah


SSI Overpayments

## Waa maxay helida lacagta dheeri ah ee khaladka ah ee SSI?

Bixin dheeraad ah waxay la micne tahay in lagu siiyay lacag SSI dheeraad ah oo ka badan intii aad heli lahayd. Tani waxay ku dhici kartaa adiga ama xafiiska Caymiska Bulshada oo qalad sameeyay. Xitaa haddii tani ku timid khalad dhankooda ah, Caymiska Bulshadu way ku weydiin karaan in lacagtaas aad soo celiso.

## Sidee isaga ilaaliyaa (uga feejignaadaa) in aan helo lacag dheeraad ah?

Caymiska Bulshada u soo sheeg isla markiiba isbedelka ku dhacay lacagtii aad heli jirtay. Xitaa haddii aad soo sheegtay isla markiiba waxaa dhici karta in jeegi ku xigay laguu soo diro iyadoo aan tiradii waxba iska bedelin. Markaas waxaad heshay lacag dheeraad ah.



Waxyaabaha keeni kara in aad hesho lacag dheeri ah waxaa ka mid ah:

- Waad guursatay
- Waxaa isbedelay dakhligaagi
- Waxaad bilowday ama joojisay shaqo.
- Waxaaad gashay cisbitaal
- Waxaa geeriyooday xaaskaagii/saygaagii
- Waxaad heshay lacag badan sida abaal gudka caymiska, ama heshii maslaxaad shil gaari

Haddii aad u malaynayso in isbedelkaas ay dhici karaan, raadso tala bixin sharci ah oo ku saabsan sidii aad yeeli lahayd si aad isaga ilaaliso in lacag dheeraad ah oo laguu soo diro. Meel dhigo cadeyn ah kolka aad soo sheegto isbedel. Nuqulo adigu naftaada u hayso ama meel ku qoro cidda aad la hadashay ee ee xafiiska Sooshal Sakuuratiga (Social Security).

## Maxaa dhici kara haddii aan qaato lacag dheeraad ah?

Caymiska Bulshadu waxay isku dayeeysaa in ay kaa soo celiso lacagta dheeraadka ah ee aad heshay. Waxay kaloo warbixin u diri karaan xafiiska dayn qabayaasha kaydiya, oo waxay kaa dhigaysaa dayn qabe (daymaysane)

- SSI waxay ku waydiin kartaa in aad hadda bixiso xisaabtaas oo dhan, ama aad waqti ku bixiso. Tan adiga ogolaansho lagu weydiin maayo.

- Waxay lacagta ka jari karaan jeegaaga SSI. Waxay jeegaaga ka qaadan karaan illaa 10% oo keliya. Tan waxaa loo yaqaan kharash celin "recoupment."

- Waxay qaadan karaan lacagta kaaga soo noqota cashuurta dawladda dhexe, ama lacag kale ee aad ku lahayd Federaalka adiga ama xaaskaaga/saygaaga. Laakiin tan ma sameeyaan haddii aad weli ku jirto SSI.

- Maxkamad ayay kaa dacweyn karaan lacagta dheeraadka ah ee aad qaadatay iyo kharajka maxkamadda. Tan ma sameeyan haddii aad weli ku jirto SSI

## Maxaan yeelaa haddii lacagta dheeriga ah ay yartahay?

Haddii ay tahay $2,000 ama wax ka yar, Caymiska Bulshadu iskuma dayayso in ay lacagta hesho, haddii aad adigu weydiisato sidaa. Tan waxaa loo yaqaan ka "dhaafid maamul." Waa aad wici kartaa waydiisana kartaa xafiiska Sooshal Sakuuratiga (Social Security) saamixidan. Uma baahnid inaad wax warqado ah buuxiso.

## Maxaan sameeyaa haddii Caymiska Bulshadu kharash celin ahaan uga jartaan jeegaygaka?

Waxaad samayn kartaa wax yaabaha soo socda:

- **Ogolow in aad soo celiso kalana shaqay qorshe dib u soo celin**. Habkaani wuxuu kuu ogolaanayaa in aad xakamayso inta laga jari karo jeegaaga. Fiiri in ay goosan karaan wax ka yar 10% jeegiiba

  **Ogow:** tirada ugu yar ee ay aqbali karaa waa $10 bishiibaa. Waxa aad waydiisan kartaa cadad kale oo dib u bixin lacagta ah adigoon sameynin wax warqado buuxin ah haddii sidoo kale aad hesho nooc kale oo gargaar lacag cadaan ah sidda MFIP, MSA, manfacyadda Halgamayaasha wadanka (Va).

- **Racfaan.** Haddii aad u malaynayso in wax dheeraad ah aadan qaadan, racfaan waad ka qaadan kartaa. Xereey racfaan qorran isla markiiba. Fiiri xoggta urursan, *Racfaanka SSI* siddi tan aad u samayn lahayd.

  - Racfaan qaado **10 maalmood** gudohood markaad heshay ogaysiinta haddii aad rabto in jeegaagu ahaado intiisii inta lagu jiro racfaanka.

  - Racfaan qaado **60 maalmood** gudohood markaad heshay ogaysiinta, haddii kale waxaad waayaysaa xaqa aad u leedahay in aad racfaan qaadato.

  **Ogow:** Caymiska Bulshadu waxay u qaadanaysa in ogaysiinta aad heshay 5 maalmood ka dib taariikhda ogaysiinta. Waxa aad isku dayi kartaa inaad racfaan qaadato ka dib 60 cisho laakiin waxa aad u baahan tahay inaad cadeyso in aad haysato sabab fiican oo ah la soo daahida racfaanka.

- **Waysiido in lagaa "dhaafo" (cafiyo).** Taas micneheedu waxa weeye in xitaa haddii lagu siiyay lacag dheeraad waajib ma ah in aad soo celiso. Haddii aadan awooodi karin in aad lacagta soo

celiso, xereey isla markiiba in lagaa cafiyo. Haddii aad xereyso 30 maalmood gudohood markii aad heshay ogaysiinta, Caymiska Bulshadu kaama goosan karaa wax lacag ah ilaa aad iyaga la kulantid. Haddii ay bilaabeen in ay lacag kaa qaataan, codsiga in lagaa cafiyo (dhaafo) waxay ka joojinaysaa in lacag lagaa qaato illaa go'aan lagaa gaaro. Waa in ay ku siiyaan cafis haddii **lacag bixinta dheeraadka ahi aysan ahayn qalad adiga xagaaga ka yimid iyo:**

- Waxay noqonaysaa wax aan caddaalad kugu ahayn in aad dib u bixiso ( tusaale, ma awoodi kartid in aad dib u bixiso, waxayna kugu noqonaysaa dhib badan, ama

- Inta dheeriga kugu ahi aad bay u yartahay mana mudna waqtiga iyo xoogga la gelinayo soo ururinteeda.

**Ogow:** Haddii sababta aad u heshay lacagta dheeriga ah ahayd addiga oo qaadanaya gargaar intii uu socday racfaanku sharcigu waa ka duwan yahay. La xiriir gargaare sharci ee 1-(877) 696-6529 ah si aad u hesho xog dheeraad ah.

**Hal mar waad wada xerayn kartaa racfaan iyo cafis ( ka dhaafid) labadaba. SSA ma aha inay kaa xayirto manfacyadda xilliga racfaanka ama inta aad sugayso go'aan ku saabsan saamixida.**



## Maxaa dhacaya haddii aan lumiyo Racfaanka ?

Haddii marka kowaad lagaa diido racfaanka iyo cafiska aad ka qaadatay lagacta dheeraadka ah, waxaa kuu sii furan racfaan kale. Fiiri xoggta urursan, *Racfaanka SSI*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**